


METRO Gold Line

Horumar ku Habboon Gaadiidka Baska Deg-degga ah (BRTOD)



Muxuu yahay BRTOD?

METRO Gold Line Bus Rapid Transit (BRT) wuxuu noqon doonaa khadkii ugu horreeyay Minnesota ee BRT ah oo ka shaqayn doona 9 mayl, oo garab socon doona dhinaca bari ee waddada weyn ee 94-ka. Horumarinta Gaadiidka Degdega ee Baska ah (BRTOD) waa nooc horumar ah oo u jirsan doona qiyaastii 1/2 mayl meel u dhaw hareeraha saldhigyada ay ka mid yihiin guryaha, xafiisyada, iyo goobaha ganacsiga ee isku dhafka ah ama waxyaabaha kale oo ku dhex yaalla xaafada ee loo lugayn karo ama baaskiil lagu tagi karo. Qorshaha BRTOD wuxuu gacan ka geysan doonaa horumarinta bulshada ee helitaanka shaqooyinka, guryaha, baahida loo qabo wax ka iibsiga dukaamada, iyo madadaalada ama jimicsiga si loo wanaajiyo tayada noloshada dadka da 'kasta ooy jiraan iyo dakhli kasta ooy haystaan.

Xarumaha METRO Gold Line BRT waxay ku kala yaallaan goobo kala duwan oo ay ka mid yihiin xarumaha bulshada iyo waliba suuqa. Magaalooyinka uu khadkani maro mid walba waxay leedahay aragtideeda u gaarka ah ee ku aaddan adeegyada iyo dhismeyaasha ku hareeraysan xarunta baska. Waxaa loo baahanyahay qorshe ballaadhan si la isugu keeno aragtida bulshada si wada jir ahna loo sameeyo qorshe isku mid ah oo loogu talagalay marinka baska oo dhan.

Bus Rapid Transit (BRT)



- Waddooyin gaar ah ama khadad loogu talagalay basaska
- Rakaabku lacagta ayay bixinayaan ka hor intaysan baska fuulin
- Basasku waxay yeelan doonaan janbiyo iyo irrid dhulka u dhow oo sahal lagu gali karo lagagana so dagi karo
- Calaamado tilmaamaya wakhtiga bixitaanka, khariirado iyo waliba calaamadaha xarumaha
- Ammaanka xarumaha iyo basaska oo sare loo qaadayo
- Basaskan ayaa ah kuwo la aqoonsan karo oo leh marinnoo waaweyn iyo irrido dheeraad ah si kuraasta curyaamada looga soo galiyo iyo waliba qalabyada kale haddii


Qorshaha BRTOD wuxuu

- Bulshada ka caawinayaa inay la timaado aragtideeda u gaarka ah ee ku aaddan goob wanaagsan oo ku habboon xarunta/boostaajada gaadiidka
- Dadka u sahlayaa inay u lugeeyaan, baaskiil u raacaan ama gaari ay ku tagaan xarunta BRT.
- Bulshada u suurto galinayaa xoojinta iyo horumarinta xarumaha dhaqaalaha/suuqa ee ku hareeraysan marinka iyo xarunta/boostaajada
- Inoo fududeynayaa aqoonsiga maalgalinta kaabayaasha iyo isbeddelka siyaasadeed ee loo baahanyahay si loo helo natiijooyinka looga baahan yahay magaalada

Bulshada Hawl-wadaagta ah

Mid kasta oo ka mid ah 10ka xarumood ee Gaadiidka Gold Line waxay leeyihiin dad si gaar ah u daneeya, oo ay ka mid yihiin saraakiisha la soo doortay iyo kuwa la magacaabay, dadka deggaanka ah, ganacsiyada ku dhow agagaarka, shaqaalaha, hay'adaha sharci-dejinta iyo kuwo kale oo badan. Magaalooyinka iyo Countyada ka wada shaqeynaya mashruucan waxay u heellan yihiin inay si toos ah ula shaqeeyaan dadka daneynaya ee uu khuseeyo mashruucan inta lagu gudajiro nidaamka, si loo hubiyo in talada bulshadu noqoto mid la fahmo, la tixgeliyo, oo ay noqota mid si toos ah uga muuqata qorshaha. Iyadoo la

adeegsanayo talooyinka laga helay bulshada oo lala fal-galinayo falanqaynta iyo farsamada suuqa, kooxaha mashruuca samaynaya waxay xarun/boostaajo walba u samayn doonaan qorshe, qorshahaas oo dib-u-eegid lagu samayn doono kaddibna loo tixgalin doono in magaalooyinka iyo countyadu aqbalaan. Qorshaha BRTOD ayaa bixin doona talooyin ku saabsan qorshaha guud ee magaalada kaas oo taageera nidaamka TOD. Qorsheyaasha horay looga ansixiyay ee looga fulayey magaalada St. Paul ayaa noqon doona kuwo laga tusaale qaato inta lagu jiro dadaallada qorsheyaashan cusub.



Horumar ku Habboon Gaadiidka (TOD)

Magaalooyinka Mataanaha ah, 2/3 safarrada gawaarida ayaa ah kuwo u qasda goobaha laga dukaamaysto, shaqeeyo ama goobaha ganacsiga. Qorshaha TOD wuxuu hal meel ku soo aruurinayaa dukaamada, guryaha iyo shaqooyinka iyadoo dhismiyeyaashani u jiri doonaan xarumaha gaadiidka wax aan ka danayn 1/2 mayl, iyadoo waddooyinkina loo nidaamiyey in lagu lugeyn karo ama baaskiil lagu wadi karo ama gaari lagu kaxayn karo. Qorshahan TOD wuxuu dhimayaa ama soo gaabinayaa safarrada gawaarida, tan oo micneheedu noqon karo in bulshada xaafadda deggani ay wax ka iibsadaan dukaamaha xaafadda, waxaa kale oo kordhi kara caafimaadka bulshada marka ay badiyaan lugta ama waditaanka baaskiilka si ay u soo dukaamaystaan.

Qorshaynta BRTOD waxay socon doontaa Gu'ga 2017 ilaa iyo 2018

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo barta internet-ka ee mashruuca.

Ka Qayb Galka Dadweynaha



Ka Qayb Qaado, Wax Badan Ka Ogow

Kooxaha ka shaqeynaya mashruucan waxay u heellan yihiin inay si toos ah ula shaqeeyaan dadka daneynaya ee uu khuseeyo mashruucan BRTOD. La soco isgaadhsiinta adoo booqanaya barta internetka ama emailka si aad wax badan uga baratid mashruucan islamarkaana aad usoo gudbiso fikradahaaga.

- Barta internetka: www.thegatewaycorridor.com/station-development/
- Email: GatewayCorridor@co.washington.mn.us; Telefoonka: 651-430-4300
- facebook.com/GatewayCorridor; twitter.com/GoldLineBRT